

Heshiis dayn cafin ah oo Dowladda Soomaaliya la gashay IMF April 6, 2016

Wasiirka Maaliyadda ee Xukuumadda Federaalka Soomaalia, Mudane Maxamed Aadan Ibraahim “Farkeeti” iyo wafti uu hogaaminaayay ayaa magaaladda Nairobi kulan socday 30 March-5-ta April la yeeshay wafti ka socday Hay'ada Sanduuqa Caalamiga Adduunka ee loo yaqaano (IMF)

Ugu horayntii wafdiga IMF oo uu hogaaminaayay Mr. Rogerio Zandamela ayaa aad usoo dhaweyey horumarada dhanka maamulka maaliyadda ee dowlada Soomaalliya ay ku talaabsatay mudooyinkii ugu danbeeyey.

“Tan iyo 2012, Dowladda Soomaaliya waxay ku talaabsatay horumar wax ku ool ah oo ku aadan dib-u-dhiska hay’adaha dhaqaale ee dalka iyo dib-u-soo noolaynta adeegyada dowladeed. Inkastoo horumarkaas baaxad leh la gaaray, hadana amniga dalka wali waxaa ka jira caqabado, sidaas daraadeed Hay’adaha dowladda waxay u baahan yihiin dib-u-habayn baaxad leh, ii loo joogteeyo dib-u-dhiska Soomaaliya waa in lahelaa taageero horumarineed oo joogto ah”

“Inkastoo ay xaalado adag dalka ka jiraan, hadana dadaalka dowladda waa mid mira dhalaya. Horukaca dhaqaalaha 2015tii waxaa lagu qiyaasay 3.7 boqolkiiba, halka sicir bararka 1% lagu qiyaasay. Si kastoo ay tahayba, dhibaatooyinka dagaalku keenay ayaa wali caqabad ku ah kor u qaadista dakhliga dowladda iyo gaarsiinta dadka adeegyada dowladda” ” ayuu yiri mr. Gogerio Zandamela

Wasiirka Maaliyadda Xukuumadda Federaalka Soomalaiya mudane Maxamed Aden Ibraahim Farketi ayaa xusay in dowladda Soomaaliya ay ka go’an tahay la tacaalida dhamaan dhibaatooyinka dalka ka jira ayna xaqiijinayso dadaalka loogu jiro hufnaanta maamulka iyo maaliyadda ee dalka, xoojinta adeegyada maaliyadeed iyo dib-u-noolaynta nidaam maaliyadeed oo isla xisaabtan ku dhisan.

“Si dadaalka dowladda ay wado loo dhiiro geliyo, dowladdu waxay heshiis dayn cafin ah la gashay hay’adda Sanduuqa Caalamiga ah (IMF) kaas oo ka bilaami doona May 2016. Heshiiskan oo fulintiisa looga baahan yahay dowladda Soomaaliya wuxuu horseed u noqon karaa in daynta Soomaaliya lagu leeyahay oo gaaraysa 5.4 Billion oo Dollar, qaarkeed laga cafiyo” ayuu yiri Wasiir Farkeeti.

Heshiisku waxuu dhanka kale diiradda saarayaa xoojinta siyaasadaha kor u qaadidda habsami u socodka maamulka maaliyadda, xoojita hay’adaha dowladda, kaabidda horumarka hay’adaha dhaqaalaha ee dalka, wax ka qabashada lacagta Shilling Soomaaliga oo duugoowday, xoojinta awoodda Bankiga Dhexe oo uu ku yeelan karo ilaalinta Xawaaladaha iyo Bankiyada gaarka loo leeyahay ee dalka.

Hadaba fulinta heshiiskan ayaa Soomaaliya u saamaxaya in ay hesho taageero dhaqaale iyo maalgalin heer caalami ah. Wuxuuna u horseedayaa in ay heshiisyo laba-geesood ah oo Soomaaliya la gasho wadamada deeq bixiyayaasha dunida. Shirka ayaa sidoo kale diiradda lagu saarayey sidii Soomaaliya looga cafin lahaa daymaha lagu leeyahay wuxuuna gogol xaar u ahaa shir 12-ka April ka dhacaya magaaladda Washington ee cariga Maraykanka kaas oo dhex mari doono Hay’ada Caalamiga ee Sanduuqa Aduunka iyo Dowladda Soomaaliya.

Ugu danbayntii Wasiirka ayaa sheegay in dowladda Soomaaliya ay ka mahad celinayso heshiiskan oo ku qotoma bilawgii dayn cafinta Soomaaliya ee ay la gashay IMF taas oo ku dhiiro gelinaysa wadamada deeq bixiyayaasha iyo hay’adaha dhaqaalaha ee aduunka in ay garab istaageen Soomaaliya si loo xaqiijiyo yididiilada dalka uu ugu jiro hanashada hawlaha qaran.